# XAQIIQOOYINKA KU SAABSAN KRATOM

## Dhir, caafimaad, waxyeello ma leh?

## WAA MAXAY KRATOM?

Kratom waa walax laga sameeyo caleemaha geedka Mitragyna speciosa. Koonfur-bari Aasiya, dadka waxay jiilal badan u isticmaaleen Kratom si ay tamar u helaan iyo inay xanuunka u yareeyaan. Gobollada Maraykanka intooda badan, Kratom waa la iibsan karaa lana iibin karaa si sharci ah. Laakiin wax sharci ah iyo wax ammaan ah isku mid ma aha. Waa kuwan waxyaabaha muhiimka ah ee aad u baahan tahay inaad ogaato.

### + Saamayntu waxay ku xiran tahay qadarka

Qadar yar wuxuu kordhin karaa tamarta iyo niyadda. Qadar badan wuxuu keeni karaa hurdo ama suuxdin iyo saamayn u eg opioids-ka oo aad uga xoog badan inta dadka badankood filayaan.

### + Waxyeellooyinka

Lalabbo, dhaawac beerka ah, dhiig-karka, murqo-xanuun, niyad-jab, iyo jahawareer ayaa dhammaantood la diiwaangeliyey. Suuxdin iyo dhalanteed ayaa la soo sheegay marka la isticmaalo qadar badan ama marka lala isku daro walxo kale.

### + Waxay noqon kartaacaado

Kratom waxay muddo ka dib keeni kartaa rabitaan xooggan oo isticmaalka ah iyo khalkhalka isticmaalka maandooriyaha. Joojinta Kratom waxay keeni kartaa calaamado dhab ah oo ka-noqosho ah, sida murqo-xanuun, hurdo la'aan, xanaaq, iyo lalabbo.

## IN LALA ISTICMAALO WALXO KALE WAA KHATAR

Isticmaalka Kratom iyadoo lala qaadanayo walxo kale wuxuu keeni karaa waxyeello halis ah. Waxay la falgeli kartaa dawooyinka dhakhtar qoro, waxayna sii xoojin kartaa saamaynta daroogooyinka waddooyinka lagu iibiyo iyo khamriga, taas oo kordhinaysa khatarta overdose-ka.

CDC waxay dib u eegtay 152 dhimasho oo lala xiriiriyey Kratom. 91% kiisaskaas, walax kale ayaa sidoo kale ku lug lahayd. Kratom keligeed dhif ayay sabab ugu noqotaa dhimasho, laakiin badanaa waxay ka mid tahay waxyaabaha dhimashada ka qayb qaata.

## KASOO KABASHADU WAA SUURAGAL

**Daawooyinka FDA ansixisay ee loogu talagalay Khalkhalka Isticmaalka Opioid-ka (MOUD) waxay kaa caawin karaan xakamaynta ku-tiirsanaanta Kratom iyo yareynta calaamadaha ka-noqoshada. Kala hadal dhakhtar si aad u ogaato xulashada daaweyn ee adiga kugu habboon.**

ISKAANGAREE SAWIRKA ISKAANKA SI AAD WAXBADAN UGA OGAATO AMA BOOQO
KNOWTHEDANGERS.COM/KRATOM

KNOW THE DANGERS .COM